



## QIYAASTA IYO SHARAXA

### XOG URUURINTA ARDAYGA EE COVID-19; Saamaynta iyo Mushkilada waxbarashada iyo badqabka Ardayga

Soo Dhawaw. Waad ku mahadsan tahay inaad danayso Xog Uruurinta Ardayga ee COVID-19. Xog uruurintan waxaa loo sameeyay si loo uruuriyo macluumaadka aragtida ardayda si ay uga caawiso hogaamiyayaasha dugsiga qorshaha dhamaadka sanadka iyo barnaamijka taageerada ardayda, iyo sidoo kale macluumaadka kaalmada qorshaynta dayrta 2022.

Xog Uruurinta Ardayga ee COVID-19 waxaa sameeyay Xafiiska Maamulaha Waxbarashada Qaran (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI), iyo Sayniska Cilmi Nafsiyada & Habdhaqanka ee Jaamacada Washington Dusiga Dawooyinka (School of Medicine, UW) si aanu u aragto fikirada, dareemaha iyo habdhaqanka ardayda wakhtiga safmarka COVID-19.

Wakhitgan, ardaydu waxay la qabsadeen qaab cusub oo waxbarasho, dad dhax gal iyo nolol. Ujeedada xog uruurintani waxaa weeye in laga caawiyo macalimiinta, hogaamiyayaasha dugsiga, waalidka, cida lagala shaqaynayo bulshada iyo hogaamiyayaasha siyaasada sidii ay u fahmi lahaayeen waxay si dhaanta u qaban lahaayeen si ay u buuxiyaan baahiyaha dhalinyartooda.

Xog uruurintan waxaa lagu waydiiyaa su'aalo ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo jidhka, taageerada bulshada ee lodka iyo dadka waawayn, fikirka iyo dareenka jawiga waxbarasho ee wakhtiga safmarka COVID-19 iyo taxadirka COVID-19.

Ka qayb galayaashu waxay u madax banaan yihiin dugsiyada. Xog uruurintu waa sir, ikhtiyaar oo waxaa la siinayaa ardayda fasalada 6 ilaa 12.

Xog uruurinta waxaa weeye gebi ahaanba onleyn oo waxaa lagu bixinayaa dugsiga oo waxaana lagu buuxin karaa dhismaha dugsiga dhaxdiisa ama guriga ardayda ku jirto waxbarashada onleynka ah.

Natiijada xog uruurinta waxaa la bixin doonaa Abriil 2022.

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan xog uruurinta fadlan la xidhiidh [contact@wacovidstudentsurvey.org](mailto:contact@wacovidstudentsurvey.org)